# Horay U Qorsheynta

Planning Ahead

## Siddee ayaan u qorsheyn karaa mustaqbalka kolka aan sii waayeeloobo?

**Horay u qorsheynta** marka da'daadu sii weynaato waa muhim waana wax wanaagsan. Waxa ay kaa caawineysaa in aad hubiso in sida aad dooneyso ay yeelaan dhakhtarkaaga iyo xubnaha qoyska. In aad horay u sii qorsheyso waxa ay u fududeysaa qoyskaaga in ay si wanaagsan u maareeyaan dhaxalkaaga geerida ka dib.

Halkan waxa aan kuugu soo gudbineynaa qaar ka mid ah su'aalaha aad ka fikireyso:

- Yaa kuu gaaraya go'aanada caafimaadka iyo maaliyadda haddii aadan adigu gaari karin go'aankaas?
- Maxaa dhacaya haddii lagu geeyo guryaha dadka lagu hayo?
- Sidee ayaad ku xaqiijineysaa in hantidaadu gaarto dadka leh dhaxalkaaga?



Waxaa jira dhowr dukumiintiyadda sharciga ah oo adiga naftaadu aad sameysan karto si ay kaaga caawiyaan wixii degdeg ah ee soo kordha iyo qorsheynta aakhirka nolosha. Ugu yaraan, waa in aad qortaa **Dardaaranka Caafimaadka** oo aad qof aad aaminsan tahay aad ugu magacaabeyso inuu kuu gaaro go'aanada haddii aadan go'aan isu gaari karin.

Iyada oo ku xiran xaaladaada, waxaa kale oo laga yaabaa in aad u baahato **Wakiilasho sharci ah**, **Dardaaran** ama **Wareejinta Hantida Dhimashada Ka Dib**.

## Dardaaranka Caafimaadka

Farida daryeeladda caafimaadku waa qoraal kuu ogolaada inaad siiso tilmaamo ku saabsan daryeelada caafimaad haddii uu yimaado waqti aadan adigu awoodin inaad go'aamadaa naftaada u gaarto.

Dardaaranka Caafimaadka waxa aad dooraneysaa:

1. Yaa noqon kara Wakiilkaaga Caafimaadka. Wakiilkaaga caafimaadka waa qofka aad ku aamintay inuu kuuu gaaro go'aanada haddii aadan gaari karin go'aano adigu.

2. Kala dardaaranto sida aad dooneyso inuu yeelo Wakiilkaaga Caafimaadka iyo sidda uusan yeeli karin.

Wakilkaaga Caafimaadka ayaa awood buuxda u leh inuu la hadlo dhakhtarkaaga, eego diiwaankaaga caafimaadka, oo go'aan ka gaaro nooca daryeelka laguu fidinayo.



Waxaa ka mid noqon kara meesha aad jeclaan laheyd in lagugu daaweeyo iyo goorta aad dooneyso in daawada la joojiyo. Doorashada adiga ayaa iska leh.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan foomka Dardaaranka Caafimaadka ee aad isticmaali karto, ka akhriso xogta ururrsan ee *Dardaaranka Caafimaadka*.

## Wakiilashada

Wakiilashadu waa dukumiinti qoraal ah oo siiya ogolaansho qof inuu kuu maamulo hantidaada/ iyo/ama arrimo dhaqaale adiga.

Qofka aad magacowdo ayaa mas'uul ka ah inuu maareeyo arrimahaaga waxaana loogu yeeraa Qof Qareen Kuu Ah. Talaabooyinka uu qado qofka aad wakiilato waxa ay la mid tahay talaabooyin aad adigu qaaday. Waxyaabaha inta badan Wakiilashaddu ay caawiso waa waxyaabaha sidda bixinta biilalka ama gadida guriga haddii aad u guurto qowlad ama guryaha dadka lagu hayo. Wakiilkaagu waxaa kale oo uu ka heli karaa akhbaar ganacsiyadda iyo goobaha aan caadiyan la wadaagin akhbaartaadda cid kale oo aan adiga ka ahayn.

**Muhim:** Xitaa haddii aad heysato foomka Wakiilashada, weli waad gaari kartaa go'aano aad u madax banaan tahay ee hantidaada iyo arrimaha maaliyadda haddii aad awoodo.

Foomka wakiilashada, waxa qofka aad wakiilatay aad awood u siin kartaa inuu go'aan kuu gaaro haddii aadan go'aan isu gaari karin. Qofka aad wakiilaneyso waajib ma aha inuu yahay qareen, laakiin waa inuu noqdaa qof aad aamisan tahay.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan foomka Dardaaranka Caafimaadka ee aad isticmaali karto, ka akhriso xogta urursan ee *Wakiil Ka Noqosho Si Sharci Ah*.




## Dardaaran

Dardaaranku waa qoraal sharci ah oo yiraa sidda aad doonayso in lacagtaada, hantidaada iyo alaabtaada loo qaybiyo kolka aad geeriyooto.   Waajib kuguma aha in aad qorto dardaaran.

Haddii aad dhimato dardaaran la'aan, sharciyadda dhaxalka ee Minnesota ayaa maamula sidda lacagtaada iyo hantidaadda loo qaybinayo. Lacagtaada iyo hantidaaddu waxa ay aadi xigtadaadda kuugu dhow dadka.  Haddii aad leedahay xaas/say iyo caruur, hantidaada iyaga ayaa loogu qeybinayaa nidaam horay loo dajiyey. Haddii aadan lahayn xilo ama ilmo, hantidaadda waxa loo bixin kala horeynta siddan ah:

- caruurta awoowaha aad u tahay
- Waalidka
- Gabdhaha iyo wiilasha
- Qaraabada fog haddii aysan jirin qaraabo dhow.

Waxa aad u baahan tahay dardaaran haddii aad rabto:

- inaad uga tagto xoolo qof aad xiriir la leedahay oo aydaan isqabin
- aad  uga tago xoolo saaxiib ama sadaqeysi
- inaad siiso wax cayiman qof
- inaad u diido inuu dhaxalkaaga wax ku yeesho qof sharciyan dhaxalkaaga wax ku leh, laakiin aadan doonaynayn inuu dhaxalka wax ku yeesho

Siddoo kale waxa aad magacaabi kartaa qof la yiraa Wakiilka Idman si uu hubiyo in dhaxalka loo qaybiyo si waafaqsan sidda uu dhigayo dardaarankaagu.

Waa ra'yi fiican in lahaado dardaaran. Laakiin xataa haddii aadan lahayn dardaaran, waa inaad qortaa cidda yeelanaysa xoolaha akoonadaada ku jira. Arrintani waxa u sahli qoyskaaga inuu ogaado cidda helaysa xoolaha sidda xoolaha ku jira akoonkaaga bangiga, caymiska noloshaada, ama xisaabaadka xoolaha ku jira akoonada lacagta hawlgabka loogu talagalay. Haddii dadka xoolaha helayaa la qoro, qoyskaagu ma aha inuu maro maxkamadda dhaxalka si ay u helaan lacagtaa.

Akhri xogta urursan *Su'aalaha Inta Badan La iska Waydiiyo Dardaaranka*.

## Wareejinta Hantida Geerida Ka Dib (TODD)



TODD waa qoraal la isticmaali karo intii la istcmaali lahaa dardaaran si loo wareejiyo hanti ma guurto ah oo aad leedahay kolka aad geeriyooto. Waxa aad kaga maarmi kartaa maxkamadda dhaxalka.

Waxa kale oo aad TODD u adeegsan kartaa in aad hantidaada ku wareejiso qofka aad nolol wadaagga tihiin ama cidii kale ee aad dooneyso Qofka aad ku wareejisaa waxaa la yiraa hele. Qofka heysta TODD wax xuquuq ama maamul ah kuma laha hantida ilaa aad ka geeriyooto. **Marka laga hadlo qorsheynta dhaxalka, kala tasho qareen fursadaha aad heysato.** Waxaa lagaa yaabaa in TODD uusan aheyn xalka ugu wanaagsan ee qof kasta.

Waxaa jira dhibaatooyin badan oo ka dhalan kara haddii aadan aheyn mulkiilaha kaliya ee hantida. TODD kama hor istaageyso xaaska/sayga ama qof kula qoran guriga inuu sheegto hantida. TODD ma hor istaagi karto rahmadda MA ama qaansheegasho liddi ku ah dhaxalka.

Akhri xogta urursan ee ku saabsan *Wareejinta Hantida Geerida Ka Dib*.

## Dadka Lagu Hayo Guryaha Kalkaaliyaasha Caafimaadka iyo Ceymiska Caafimaadka Gobolka

Ka fikir sida ay suurogal u tahay in lagu geeyo guryaha dadka lagu hayo waa talaabo kale oo muhim ah in aad sii qorsheyso. Guryaha kalkaaliyaasha caafimaadka ee dadka

lagu hayo waa kuwo aad qaali u ah. Waxa aad ku bixineysaa hantidaada si aad halkaas u joogto.

Ceymiska Caafimaadka Gobolka (MA) waxa uu bixiyaa marka aanay dadku laheyn hanti la tirin karo ama ay hantida ay heystaan yar tahay oo ay ka soo baxaan shuruudaha. Medical Assistance wuxuu kaloo bixin karaa caawimaadka aad ku hesho gurigaaga iyo qaar ka mid ah joogida xaqqa u leh ee Guryaha Adeega leh ama rugaha Nolol Gargaarida ee dadka lagu hayo.

Sharciyada u degsan MA waa kuwo aad u cakiran. Mid ka mid ah kuwa uga muhiinsani waa ma aad bixin kartin lacag ama hanti adigoo ku bixinaya qiimo ka yar qiimahooda saxa ah ee suuqa. Degmada aad ka codsato waxa ay dib u eegaan sida aad ku bixisay dhamaan hantida aad iibisay ama wareejisay 5tii sano ee la soo dhaafay ka hor inta aadan codsan. 5 taa sanno, haddii:

- aad siiso gurigaaga ilmahaaga adigoo u saxiixaya mulkiyada guriga ama
- aad ka takhalusto lacag ama hanti adigoo ku gadaya in yar inta ay goyso.

**Waxa aad ku mudaneysaa ganaax.**



Haddii aad bixiso lacag ama hanti aad ku gado in ka yar inta ay ka goyso suuqa, waa laguu diidi kartaa kaarka caafimaadka ee Medical Assistance bilo ama sannado. Taasi waxa ay dhibaato culus ku keeni kartaa qoyskaaga. Waxaa jira qareeno ku takhasusay Sharciyada Dadka Waaweyn. Waxa ay kaa caawin karaan in aad qorsheyso si aad u reebato lacagta ugu badan ee suurogalka ah iyo hantidaada welina aad xaq u yeelato Ceymiska Caafimaadka ee Gobolka. La tasho qareen qaabilsan Sharciyada dadka Waaweyn hadii aad leedahay dakhli fara badan iyo hanti.

Akhri xogta urursan ee [Gagaarida Nolosha iyo Guryaha Haynta.]

## Qodobada La Xiriira:

*Su'aalaha Ku Saabsan Dhaxalka*

*Mas'uul Ka Noqoshada Iyo U Maamulidda Dhaqaalaha*

## Mareegta aad ka heli karto xog dheeraad ah:

Xisaabiyaha Lacagta Hawlgabka ee Ceymiska Bulshada:
www.ssa.gov/retire/estimator.html

Minnesota Department of Human Services (Waaxda Adeegga Dadweynaha ee Minnesota): Health Care Coverage for People Who Need Nursing Home Care (Ceymiska Caafimaadka ee Dadka Lagu Hayo Guryaha Kalkaaliyaasha Caafimaadka) ama soo booqo: www.mn.gov/dhs and type *health care coverage for people who need nursing home care* into the search bar.

Senior Linkage Line (Kahdka lagu caawiyo dadka da'da ah): 1-800-333-2433

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**